



# Impetigo (Cudurka Maqaarka Ku Dhaca)

Waalidka ama Masuulka Qaaliga ahoow,

Waxaa laguu siinayaa xaashidan xogeed:

- Sababtoo ah adiga ama canugaada ayaa laga yaabaa in uu idin haleelay impetigo.
- Ujeeddooyin macluumaad oo keliya.

## Xogta Guud Ee Ku Saabsan Impetigo

### Waa maxay impetigo?

- Waa caabuq caam ah oo ku dhaca maqaarka.
- Labo nooc oo bakteeriyo ah ayaa sababi karaan impetigo: Kooxda A ee streptococcus (Qaybta Kooxda A) iyo Staphylococcus aureus.
- Caabuqa Impetigo ayaa wuxuu dhici karaa xili kasta inta lagu jiro sanadka laakiin kan ugu badan ayaa dhaca inta lagu jiro cimilada kulul.

### Yuu ku dhici karaa?

- Qof kasta waa uu ku dhici karaa Impetigo.
- Waxa uu ku badan yahay carruurta 2 ilaa 5 sano jirada ah.

### Waa maxay astaamaha?

- Caabuqa Impetigo wuxuu ku biloowdaa finan yaryar oo cascias kuwaas oo noqda furuq biyood yaryar.
- Marka finanku furmaan, waxay abuuraan malax balaaran, oo malabka u eg taasoo qalasha, kadibna abuuraysa dhagdhag, bacad ah oo ku dhagaaya maqaarka.
- Finanku waa kuwo xanuun badan oo cuncun leh.
- Caabuqa Impetigo wuxuu inta badan ka soo baxaa wajiga, gaar ahaana aagaga afka iyo sanka.

### Sidee ayey ku faafcaa?

- Bakteeriyyada sababta Impetigo ayaa ku jirta dhiicaanka ku jira finanka.
- Haddii qof taabto dheecaanka finanka kadibna taabto meel furan oo maqaarka kamid ah (dhaawaca meel go'day, nabar, ama maqaar dilaacay) asagoon gacmaha dhaqin, bakteeriyyada ayaa galaysa maqaarka furan, labo jibaarmaysa, kadibna abuuraysa caabuq.
  - Xoqida ayaa faafin karta caabuqa.
- Bakteeriyyada ayaa sidoo kale ku faafi karta wadaagista alaabta qoyska sida dharka, shukumaannada, iyo go'yaasha lagu seexdo.

## Sidee Ayaan Ku Ogaanayaa Haddii Cunugaygu Qabo Caabuqa Impetigo?

Daryeel bixiyaha caafimaad ayaa baari kara caabuqa Impetigo asagoo eegaya muuqaalka nabarada ku yaala maqaarka.

Haddii aad qabto su'aalo dheeraad ah ama aad ka walaacsan tahay in canugaagu qabo caabuqa impetigo, la xiriir daryeel-bixiyahaaga caafimaadka. Xaashidaan xogeed waxay ku siineysaa macluumaad guud oo keliya.

---

## Kawaran Haddii Canugeygu Uu Qabo Caabuqa Impetigo?

Isla markiiba ogeysii daryeel bixiyaha caafimaadka ee cunuggaaga ama dugsiga barbaarinta caruurta haddii canugaagu qabo caabuqa impetigo.

### Sidee loo daaweyyaa?

- Dadka qaba caabuqa impetigo waa inay u tagaan dhakhtar. Dhakhtar ayaa kuu qori doona midkood boomaatada finanka ama antibiyootiga afka.

### Sidee ayaan uga hortagi karaa in caabuqa impetigo uu faafo?

- Gacmaha had iyo jeer ku dhaq saabuun iyo biyo diirran.
  - Dadka qaba caabuqa impetigo waa inay finankooda iyo dheecaankiisa ku daboolaan faashado nadiif ah oo qalalan.
  - Iska ilaali inaad taabato dhaawacyada iyo faashadaha dadka kale.
  - Iska ilaali wadaagista alaabta shakhsi ahaaneed, sida shukumaanada, dharka, iyo bustayaasha.
  - Dhaq dharka, go'gosha, iyo shukumaannada ay adeegsadeen dadka qaba caabuqa impetigo maalin kasta.
  - Si xooggan u nadiifi boombalada iyo alaabeyda kale ee ay carruurtu wadaagto adigoo ku dhaqaya saabuun iyo biyo.
  - Nadiifi oo jeermiska ka dil dusha sare ee sagxadaha guriga.
  - Gaabinta cidiyaha faraha ayaa kaa caawin karta yareynta isxoqista iyo nabarada. Nadiifinta faraha cidiyaha ayaa kaa caawin karta iska ilaalinta caabuqyada maqaarka.
- 

## Canugeygu Ma U Baahan Yahay Inuu Iska Joogo Guriga oo uu Ka Haro Goobta Xannaanada Carruurta?

**Haa.** Carruurta qaba caabuqa impetigo ayaa u baahan inay guriga joogaan. Waxay ku soo laaban karaan xarunta daryeelka carruurta marba haddii:

- ay ka soo wareegato 24 saac markii ay bilaabeen qaadashada antibiyootigyada;
- ay dabooli karaan nabarada;
- ay dareemayaan inay qabaan caafimaad ku filan oo ay kaga qaybqaataan hawlaha fasalka.

**Fadlan raac xeerarka barnaamijka xannaanada ee canugaaga.**

---

### Tixraacyada

American Academy of Pediatrics

- Managing Infectious Diseases in Child Care and Schools, 6<sup>th</sup> Edition. pages 123-124

Centers for Disease Control & Prevention

- Impetigo: All You Need to Know. <https://www.cdc.gov/groupastrep/diseases-public/impetigo.html>